



QORSHAHA ISTIRAATIJIYADDA EE 2019-2023



spps.org/strategicplan

Natiijooyinka Ardayga Ee Muddada Dheer

Qorshaha Istiraatiijiyadda ee “SPPS Achieves” wuxuu ku saabsanyahay lix qodob oo sal looga dhiigay natiijada dhinaca waxbarashada ee ardayda ee waqtiga fog. Si loo wanaajiyo guulaha waxbarasho ee ardayda oo dhan, qodobadan soo socda ayaan ooga saaraynaa.

1	2	3	4	5	6
Yaraynta farqiga waxbarasho ee ardayda ee ku salaysan midabka, qowmiyadda, dhaqanka, ama jinsiyadda	Kordhinta guulaha waxbarasho ee ardayda barata Luqada Ingiriiska	Kordhinta guulaha waxbarasho ee ardayda hela adeegyada gaarka ah	Wanaajinta diyaar-garowga galitaanka fasalka kindergarten	Kordhinta waxbarashada akhriska iyo xisaabta ee ardayda oo dhan	U'diyaarinta ardayda oo dhan galitaanka jaamacadaha, ama nolosha ka dambaysa dugsiga sare

Waxyaabaha Diiradda Lagu Saarayo Istiraatiijiyadda

Waxyaabaha Diiradda Lagu Saarayo Istiraatiijiyadda ka degmo ahaan waa waxyaabaha aan doonayno inaan sare ugu qaadno guulaha waxbarasho ee ardayda. Waxyaabaha aan diiradda saarayno waxaa ka mid ah:

Dhaqanka wanaagsan ee iskuullada iyo degmada	Hab wax-barid oo shaqaynaya kuna habboon dhaqanka	Qiimaynta Barnaamijyada iyo Astaynta Dakhliga	Kuleejka iyo Shaqooyinka	Fursadaha qoysaska
In la sameeyo bulsho loo dhanyahay oo is aaminsan oo wada shaqaysa iskuulka gudihiisa iyo dibadiisaba.	In ardayda wax loo baro hab ku habboon arday walba si ay ardaydu ula socdaan cashirrada islamarkaana u dareemaan qadarin.	Evaluate effectiveness of current programs and make informed adjustments and investments.	In ardayda la tuso fursado badan oo dhinaca kuleejka ama shqooyinka ah intay wali dhiganayaan iskuulka sare, in la siiyo koorsooyinka kuleejka iyo waliba inay ka qayb-galaan shqooyinka carbiska/ barbarashada ah.	In qoysasku ay fursad u helaan barashada nidaamka iyo habka ay iskuulladu u shaqeeyaan iyo barnaamijyada tirada badan ee ay bixiyaan iskuulladu.

U'jeedooyinka

U'jeedooyinku waa go'aamada laga gaaray sidii looga hawl-gali lahaa waxyaabaha diiradda lagu saarayo istiraatiijiyadda.

Hindiseyaasha Istaraatiijiga ah

Hindisaha istaraatiijiyadeed waa mashruucyo muhiim ah kuwaas oo gacan ka geysan doona in ay isbeddel lagu sameeyo waxbarashada iyo guulaha ardayga. Qorshe kasta waxaa ka mid ah qorshe-hawleedkiisa kaas oo qeexaya baaxadda, natiijooyinka la rabo in la gaaro, waqtiga kama dambaysta ah ee lagu dhamaynayo, iyo cabbiraadda qeexaysa guusha iyo natiijada qorshaha.

Wejiga 1aad

Dukumeentigani wuxuu faahfaahin ka bixinayaa Wejiga 1aad ee qorshaha sida ku xusan bogga iyo shaxda soo socda. Hawlaha aan la calaamadin ayaa ka dhigan shaqooyin dheeraad ah oo dhici doona wajiga xiga ee qorshahan istaraatiijiyadeed ee shanta sano ah. Hawlaha loo xulay fulinta Wejiga 1aad waxaa lagu saleeyay go'aamintooda dhowr arrimood oo ay ka mid yihiin:

- La-jaan-qaadidda waxyaabaha aan hadda samayno
- Baahida hawsha loo qabo
- Khayraadka la heli karo
- Caddadka shaqada u taalla shaqaalaha

Sida Aan U Horumarin Doonno Guulaha Waxbarasho Ee Ardayda

(Wejiga 1aad Hindiseyaasha Istaraatiijiga ah)

1a: Hirgelinta Dhaqdhaqaaqa Horumarinta iyo Taageerada Habdhaqanka wanaagsan (PBIS) ee iskuul walba, iyo isku dhafka taageerida barashada daareenka bulshada

Hawlgalada Wanaagsan iyo Taageerada Habdhaqanka (PBIS) waa hab waxbarasho oo ku salaysan ka-hortag iyo dib u soo-celinta habdhaqanka dabeecadeed oo taageera guulaha tacliineed iyo bulsho ee dhammaan ardayda.

2a: Hagaajinta hab-dhaqanka iyadoo la isticmaalayo talooyin ka yimid ardayda, shaqaalaha iyo qoysaska

Sidiisaba, hab-dhaqanku waa wax si ula kac ah loogu talagalay oo loo abuuray iyada uu aadanahu oo dooranayo sida uu hab-dhaqankiisu noqonayo

3a: Hirgelinta waxqabadyada dhaqanka ku habboon ee waxbarashada ardayga iyo barnaamijka

Hab-dhaqannada habboon waxay ku saleysan yihiin abuurista jawi waxbarasho oo qiimeeya jinsiyadaha iyo qowmiyadaha kala duwan si oo gaaro guulaha iyo natiijooyinka tacliimeed ee la beegsanayo.

3b: Hubinta in dhammaan ardaydu ay helaan fursad waxbarasho

Waxbarashada si wanaagsan loo soo agaasimay, maadooyinka tacliinta ee Minnesota waxaa si mug iyo micn leh loogu dhigaa iskuul kasta xilliga lagu jiro waxbarashada caadiga ah ee iskuulka.

5a: Hirgelinta nidaam lagu qiimeeyo wax tarka barnaamijka

Si loo qiimeeyo wax tarka barnaamijyada, waxaa loo baahanyahay nidaam lagu uruuriyo laguna falanqeeyo xogta, iyo sameynta qorshe si cad loogu fahmi karo masuuliyadaha go'aan qaadashada.

5b: Go'aaminta qaabka dugsiga dhexe ee degmada oo dhan

Nidaam wanaagsan oo dugsiga dhexe yeesho waxaa ka mid ah koorsooyinka muhiimka ah iyo koorsooyinka doorashada, koox joogto ah oo taageera macalimiinta iyo la taliyeyaasha, iyo barnaamijyada ardayda u'diyaarinaya galitaanka kuliyaadaha iyo xirfadaha shaqo.

6a: Abuuritaanka manhajka la xidhiidha shaqooyinka iyo qorsheyaasha waxbarashada shakhsiyeed ee dhammaan ardayda fasallada PreK-12

Samaynta qorshe shakhsiyeed waa hab ardayda u tixgeliya xooggooda iyo waxyaabaha ay xiisaynayaan, waxayna hagi karaan doorashooyinka koorsooyinka ee ardayga. Iyadoo uu weheliyo manhajka shaqada, qorshuhu wuxuu ardayda ka caawinayaa inay u diyaargarobaan galitaanka kuleejka, shaqada, iyo nololka ka dambaysa dugsiga sare.

7a: Xoojinta iskaashiga goobaha bixiya koorsooyinka kuleejka, farsamada warshadaha iyo khibrada shaqada ee ardayda dugsiga sare

Iskaashigu wuxuu taageeraa dariiqooyin xirfadeed oo xooggan, kuwaas oo ardayda siinaya fursado ay kaga qayb qaataan koorsooyinka iyo waxqabadyada kale ee la xiriira danahooda iyo ujeedooyinkooda shaqo.


8a: Aqoonsiga siyaabaha bulshada looga qayb-galin karo go'aamada iyo hawlaha degmada

Ka qaybqaadashada ixtiraamka ku salaysan waxaa ka mid ah in si joogtada ah oo daahfurn loo dhaqan-galiyo isla-xisaabtan loona bandhigo saamileyda gudaha iyo dibadda ee ku saabsan geedi socodka, go'aan qaadashada, iyo abuurista fursado dhab ah.

9a: Dib-u-eegidda iyo hagaajinta cilaaqaadka ururada dibadda si loo daboolo baahida ardayga

Iskaashiga hawlgalka ee la jaanqaadaya waxay isku waafaqsan yihiin qorshaha istaraatiijiyadeed iyadoo uu noqonayo mid wax-tar u leh natiijooyinka ardayga ee muddada dheer.

SPPS Achieves Strategic Plan



Kordhinta guulaha waxbarasho ee ardayda hesha adeegyada waxbarashada gaarka ah

Hagaajinta diyaargarowga fasallada (kindergarden) xannaanada

Kordhinta kobaca tacliinta ee akhriska iyo xisaabta ee dhammaan ardayda

U diyaar-garaynta dhammaan ardayda qalin jabiya inaya galaan kuleejka, shaqooyinka iyo nolasha ka dambaysa dugsiga sare

Diiradda Lagu Raatiijiyadda
 Waxbarashada iyo Qoondaynta Waxbarashada

Waxyaabaha Diiradda Lagu Saarayo Istiraatiijiyadda
 Tubta Kuleejka iyo shaqooyinka

Waxyaabaha Diiradda Lagu Saarayo Istiraatiijiyadda
 Ka-qaybgalinta Taloooyinka ee Qoysaska iyo Bulshada

Ujeeddada 5'aad

Waxbarashada iyo wadidda waxbarashada ee eegayo waxtarkooda waxbarashada

Qorshayaasha Istiraatiijiga ah

Lagu qiimeeyo waxtarka waxbarashada (Wejiga 1'aad)

Waxbarashada barnaamijka ee waxbarashada (Wejiga 1'aad)

Waxbarashada ayraadka si ku xataa ah*

Ujeeddada 6'aad

Kordhinta fursadaha ardayda si ay u arkaan mustaqbalkooda, sahamiyaan xirfadaha iyo waliba si ay ugu diyaargarooobaan kuleejka

Qorshayaasha Istiraatiijiga ah

6a. Samaynta manhaj la xidhiidha shaqooyinka iyo qorshayaasha shakhsiyeed ee dhammaan ardayda fasallada PreK-12 (Wejiga 1'aad)

Ujeeddada 7'aad

Bixinta fursado waxbarasho oo ku salaysan xirfadaha shaqada, iyo xirfad-gacmeed loo sameeyo ardayda iskuullada dhexe iyo sare.

Qorshayaasha Istiraatiijiga ah

7a. Xoojinta iskaashiyada lal sameeyo goobaha bixiya koorsooyinka kuleejka, barashada shaqooyinka iyo waayo-aragnimada shaqo ee ardayda dugsiga sare (Wejiga 1'aad)

7b. Kordhinta tayada tacliinta ee lagu barto xirfadaha shaqo*

Ujeeddada 8'aad

Wanaajinta nidaamka ka qaybgalka saamileyaasha ee go'aannada heer degmo

Qorshayaasha Istiraatiijiga ah

8a. Aqoonsiga siyaabaha lagu dhexdhexaadiyo bulshada ee go'aannada iyo qorshayaasha degmada (Wejiga 1'aad)

Ujeeddada 9'aad

Xoojinta iyo wanaajinta iskaashiyada si loo badiyo wax-qabadka

Qorshayaasha Istiraatiijiga ah

9a. Dib u eegida iyo wanaajinta xiriirka ururada dibadda sida ugu haboon ee loo dabooli karo baahiyaha ardayga (Wejiga 1'aad)

Ujeeddada 10'aad

Hagaajinta nidaamka ka-qaybgalka iskuulka ee qoyska si ay u taageeraan guusha ardayga

Qorshayaasha Istiraatiijiga ah

10a. In Iskuulada laga dhigo xarumo isku keena macallimiinta, qoysaska iyo bulshada*

10b. In la sameeyo barnaamijyada loogu talagalay qoysaska iyo bulshada oo lagu taageero kobcinta shakhsi ahaaneed iyo horumarinta tacliinta ardayda*

* Waxaa jiri doona shaqo dheeraad ah oo ku saabsan marxaladda xigta ee qorshaha istiraatiijiyadeed ee shanta sano ee soo socota



Saint Paul
PUBLIC SCHOOLS

Inspire students to **think critically**, pursue their **dreams** and **change the world**.